



Wasaaradda Cadaaladda Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS) waxay adeegyo siisaa bulshooyinka ku faafsan Mareykanka, ay ka mid yihiin ururrada Muslimka, Carabta, Siingaha, Asiyada Koonfur, iyo Hinduuga (MASSAH) si loo yareeyo iskudhaca iyo xiisadaha iyo loo caawiyo shaqadooda si looga hortago loogana jawaabo dambiyada naceybka iyo dhacdooyinka. CRS taariikhdeeda dheer ee la shaqeynta kooxaha MASSAH ayadoo la kaashaneysa nabad sugidda, dowladda iyo bulshada kale ee qeybta ah.

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS)

La shaqeynta Bulshooyinka Muslimka, Carabta, Siingaha, Aasiyada Koonfureed, iyo Bulshooyinka Hinduuga ah

CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” ayadoo fududeynaysa fahanka iyo wanaajinta xiriirka dadka soo foodsaartay iskudhac, iyo awoodda bulshada si gooni ah uga hortagto oona xalliso iskudhaca mustaqbalka.

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waxay ka jawaabtaa iskudhac bulshada ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. CRS ma laha awood sharci hirgelin ama maxkamadeyn. Laakin, CRS waxay la shaqeysaa bulshooyinka iskudhacay inay dibu dhisaan xiriirka, fududeysaa is wada fahanka, ayna dhiirri gelisaa xal degaanka ah.

Heshiiyeyasha CRS waxay si toos ah ula shaqeeyaan saraakiisha gobolka iyo degaanka, ururrada bulshada, kuwa u dooda bulshada iyo xuquuqda rayidka, kooxaha diinta, iyo nabad sugidda si tabarruc ah ee lacag la'aan ah. CRS waxay u shaqeysaa si dhexdhexaad ah, adeegyadeedana waa kuwa lacag la'aan ah eoo asturan.

CRS waxay siisaa bulshooyinka afar adeeg ee gaar ah: ▼

Fududeynta Wadahadalka. CRS waxay fududeysaa wadahadalka u dhaxeeya bulshada qeybaheeda si loo furo xiriirka u dhaxeeya dhinacyada. Mowduucyada badanaa wax laga qabto waxaa ka mid ah takoorka, xiriirka bulshada iyo boliiska, dambiyada naceybka iyo dhacdooyinka naceybka, iskudhaca qabaa'ilka, dibadbaxa, iyo arrimo kale ee bulshada muhiim u ah.

Tababar. Barnaamijka tababarka CRS waxuu isku keena wakiillo ka socda gobolka iyo hay'adaha dowladda deeganka, ururrada diinta, nabad sugidda, kooxaha dadka u dooda, iyo kooxo kale si loo horumariyo fahan guud loona caddeeyo siyaabaha laysku kaashado ee loo yareeyo iskudhaca bulshada.

Dhexdhexaadin. CRS waxay bixisaa adeegyo dhexdhexaadin ah si bulshada uga caawiso xallinta iskudhaca iyo xiisadaha si fool ka fool ah dhinacyada uga garrootamaan. Ujeeddada dhexdhexaadinta waa in heshiisiin loo sameeyo xubnaha bulshada ee lagu kordhiyo is aaminka, iskaashiga bulshada, iyo loo dhiso tayada deegaanka si looga hortago loogana jawaabo iskudhac mustaqbalka ah.

La Talin. CRS waxa bixisaa adeegyo la talin ah si loo caawiyo in bulshooyinka ay si waxtar leh uga jawaabaan iskudhaca. La talintaan waxaa ka mid ah caawin teknikada ah si loo dhiso guddi xiriirka dadka ah, sida ugu wanaagsan ee loola xiriiro bulshooyin kala duwan, iyo tababarka arrimaha xiriirka, xallinta is afgaran waaga, iyo sida leyskula xaliyo dhibaataada.

CRS waxay caawisaa bulshooyinka Muslim, Arab, Asia, Hindu (MASSAH): ▼

CRS waxaa ka go'an inay la shaqeysa bulshooyinka MASSA, si looga hortago loogana jawaabo iskudhaca, xiisadaha, dambiyada naceybka, iyo dhacdooyinka naceybka. Sanadkii 2017, Maalmulaha Barnaamijka Wadanka ee bulshooyinka MASSAH waxuu qabtay madallo dambiga naceybka ee wadanka oo idil ah, dhinaca xeebta bari (New York iyo Pennsylvania,) ilaa Galbeedka dhexe (Iowa, Nebraska, Kansas, iyo South Dakota), ilaa xeebta galbeed (Washington iyo Oregon).

Afar baarnaamij ee CRS ayaa si baahsan looga hirgeliyay bulshooyinka MASSAH: ▼

La shaqeynta iyo Dhisida Iskaashiga Muslimka Mareykanka iyo Siingaha Mareykanka. CRS waxay bixisaa barnaamijyo wacyigelin ee Muslimka Mareykanka iyo Siingaha Mareykanka si loo baro nabad sugidda iyo saraakiisha dowladda sida ugu wanaagsan ee loola xiriir bulshooyinka Muslimka iyo Siingaha. Tababarka waxaa kaloo loo bixin karaa sida mid kamid ah dadaalka guud ee loo adkeeyo saraakiisha deegaanka iyo Muslimka iyo Siingaha Mareykanka ay u adeegaan.

Dhacdooyinka Takoorista iyo Madalaha Dembiyada Naceybka. Madashan maalin barkeeda soconaysa waxay siisa xubnaha bulshada iyo nabad sugidda macluumaad la xiriira sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., iyo sharciyada dambiyada naceybka ee gobolka iyo deegaanka. Barnaamijka waxuu la howlgalaa nabad sugidda degaanka, garyaqaannada deegaanka, nabad sugidda federaalka, si looga hadlo, loona wadaago macuulmaad ah sida loola dagaalo loogana jawaabo dhacdooyinka dambiyada naceybka iyo eexda. CRS waxay kaloo qabataa madal wacyigelin bulsho ah si loo adkeeyo xiriirka u dhaxeeya kooxaha bulshada iyo federaalka, gobolka, iyo/ama nabad sugidda deegaanka ama hay'ado kale ee dowladda ah.

Ilaalinta Madalaha Goobaha Cibaadada. Madashan maalin barkeedka ah waxay siisaa hormuudka arrimaha diiniga iyo jameecooyinka macluumaad ku saabsan dambiyada naceybka diimaha, qiimeynta khatarta ee deegaanka, gobolka iyo nabad sugidda federaalka ay sameeyaan iyo tallaabooyinka looga difaaco inuu dhaco falalka dambiyada naceybka. Barnaamijka waxuu dhiirri geliyaa in la howlgeliyo barnaajim amniga ah, sida ugu wanaagsan ee amniga loo dhowro, kobcinta isku xirka bulshada, uuna bixiyaa macluumaad sida tusaalayaal qorshaha amniga ah iyo sida bulshada jawaab uga bixiso.

Barnaamijka Ogaashada Dhibaataada iyo Isla Xallinteeda ee Magaalada ama Iskoolka ee loo soo gaabiyo (City-SPIRIT iyo Shool SPIRIT): Barnaamijkan sideeda saac soconayo ee dhibaato-xallinta ah waxuu isku keenaa wakiillo ka socda dowladda deegaanka, iskoolada, bulshada, ururrada diiniga, nabad sugidda, iyo kuwa kale si loo ogaado loona falanqeeyo arrimaha waxyeelleynayso bulshada, loo fududeeyo wada shaqeynta lagu xaliyo iskudhaca, iyo loo fududeeyo horumarinta falal muuqdo ee u dhaxeeya dhinacyada.

CRS waxay ka howl gashaa toban xafiis goboleed iyo afar xafiis ee goobaha laga howlgalo ah: ▼

Xarunta CRS 📍
Washington, DC

Xafiisyada Gobolada CRS 📍

New England
Boston, MA

Waqooyi-bari
New York, NY

Atlantiga-Dhexe
Philadelphia, PA

Konfur-bari
Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe
Chicago, IL

Konfur-galbeed
Dallas, TX

Dhexda
Kansas City, MO


Buuraleyda
Denver, CO

Galbeedka
Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed
Seattle, WA

Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL Houston, TX
Detroit, MI San Francisco, CA



Wixii macluumaad dheeri ah ee adeegyada CRS: ▼

fadlan naga soo wac 202-305-2935, email noo soo dir askcrs@usdoj.gov ama naga soo booqo bogga internet ka: www.justice.gov/crs.



@DOJ_CRS

facebook.com/DOJCRS/

Si aad wargeliso denbi nacayb ah fadlan kala xiriir xafiiska FBI ee degaanka: <https://www.fbi.gov/contact-us/field-offices>.